Convention on the Inter-Governemntal maritime Consultative Organisation (now IMO) 1948
www.somalilandlaw.com



SHARCI L. 9 ee 4 Maarso 1978, oggolaansho Xubin ka noqosho J.D.S. AxdigaUrurka I.M.C.O.

MADAXWAYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQ. SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Qodobka 6aad iyo 57aad ee Axdigan.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Baahida loo qabo xubin ka mid noqosha Axdiga Ururka I.M.C.O. ee lagu saxeexay Jineefa, 6dii Maarso, 1948.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee 23kii Febraayo, 1978.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda:-

Qodobka 1aad

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya way oggolaatay inay xubin ka noqoto Axdiga Ururka I.M.C.O. ee lagu saxeexay Jineefa, 6dii Maarso, 1948.

Qodobka 2aad

Axdigani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, sida waafaqsan qodobka 60aad ee Axdigan.

Waxa lagu soo saari doonaa sharcigan Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 4 Maarso 1978.

Madaxweynaha

Jamhuuriyadda Dimoq. Soomaaliya

Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW N. 9 of 4th March 1978 the acceptance of the Somali Democratic Republic to the I.M.C.O Convention.

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN : The 1st, 2nd, and 3rd, Charters of October 21st. Revolution 1969 .

HAVING SEEN : Law No. 1, 17, 18 and 19 of 1st. July 1976

HAVING SEEN : Articles 6 and 57 of the foresaid Convention.

CONSIDERING : The necessity to accept the Convention on Inter-Governmental Maritime Consultative Organization, done in Geneva on 6th March, 1948.

TAKING NOTE : Of the Approval of the Political Bureau and the Council of Ministers on 23rd, February, 1978.

Hereby promulgates the following law :

Article I

The Somali Democratic Republic hereby accepts the Convention on the Inter-Governmental Marittime Consultative Organization done in Geneva on 6th March, 1948.

Art.II

The Convention shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic in accordance with Article 60 of the Convention.

This law shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 4th March 1978.

Major GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT